# Gargaarka Kabitaanka ee Minnesota (MSA)

MSA – (Minnesota Supplemental Aid)

## Waa maxay MSA?

MSA waa Gargaarka Kabitaanka ee Minnesota. Waa lacag yar oo gobolku bixiyo oo la siiyo dadka dakhligoodu yar yahay ee da'da ah, indhaha la'a ama naafada ah ee la saiiyo Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI). Siddoo kale waa suurtagal inaad xaq u yeelato Gargaarka Kaabida ee Minnesota (MSA) haddii aad qaadato manfacyadda Sooshal Sakuuratiga (Social Security Disability (SSDI)) ee naafadda la siiyo oo ka yare badan cadaddka la siiyo dadka qaata SSI. Waxaa dhici karta in lagu siiyo kaarka caafimaadka ee MSA haddii:

- Aad kaligaa nooshahay aadna qaadato lacagta SSI ama manfac SSDI ah oo hooseeya.
- Lamaanayaasha isqaba ee kaligood nool, qaatana heerka SSI ee lamaanaha.
- Aad ku nooshahay rugaha aan noocyo daryeelada caafimaadka ka mid aan lagu bixin, sidda guryaha kooxaha dadka ahi ay wada degan yihiin oo kale.

Sababtoo ah sidda MSA loo xisaabo, caadiyan ma aad heli kartid haddii aad la nooshahay cid kale, marka laga reebo xilo qaata lacagta SSI da ah. Cadadka aad heli kartaa waa uu isbedeli karaa sannad walba kolka la qawimo kharashka nolol maalmeedka.

Iyada oo la eegayo sida loo xisaabo MSA, inta badan laguma siinayo haddii aad qof kale ladegan tahay marka laga reebo sayga/xaaska oo isna la siiyo SSI.



Haddii aad keli u nooshahay oo aad:

- Leedahay heshiiska kirada oo kuu gaar ah.
- Waxa aad leedahay ugu yaraan qol adiga kuu gaar ah, iyo
- Cuntadaada u iibsato oo u karsato si gaar ah.

Haddii aad degan tahay goob noocaas oo kale ah oo laguu diiday MSA la xiriir Legal Aid.

Dakhli kasta oo ka sareeya lacagta lagaa siiyo SSI waa laguu xisaaabayaa gargaarka MSA, laakiin haddii aad shaqeyso, qeyb ka mid ah dakhliga ku soo gala laguuma xisaabayo.

## Lacagta Baahida Gaarka Ah

Haddii aad ka soo baxado shuruudaha ku xiran MSA, waxaa suurogal ah mararka qaarkood in aad heli karto lacag dheeraad ah haddii:

- Aad u baahan cunto gaar ah oo dhakhtar kuu qoray.

- haddii aad leedahay wakiil, qof mas'uul kaa ah, qof hantidaada maamula oo aad lacag siiso.
- Haddii aad leedahay dayactirka guryaha oo marka kaliya ah ama aad bedeleyso mid ah alaabada guriga.
- Kirada aad bixisaa aad u sareyso.
  - Aad ka guureyso goob lagugu hayey ama isbitaalka dhimirka ama
  - Lagaa dhaafay adeegga Gargaarka Caafimaadka (Ceymiska) (MA)

Waxaa kaloo jira Gargaar guryaha oo MSA ah. Waa manfac ka caawiya dadka guryaha. Haddii aad qaadato MSA,  waxa aad heli kartaa $472 oo kale bil walba haddii kharaskhaaga gurigu uu ka badan yahay 40% dakhligaaga. Arrintani waa ay isbedeshaa bisha Luulyo 1 deeda ee kasta.

## Miyaan codsan karaa MSA?

Haa, haddii aad:

- Tahay 65 jir ah ama ka weyn.

- Ma u tahay indhoole ama naafo sidda uu u cadeeyo xafiiska Sooshal Sakuuratigu (Social Security) ama Kooxda Dib eegida Caafimaadka ee Gobolku da'daaduna ma u dhaxeeysaa 18 iyo 65 sanno jir. MSA waxa ay adeegsataa sharciyo la mid ah kuwa Lambarka Bulshada sida kuwa dadka naafada ah. Waxa aad kahelikartaa macluumaad arrintan ku saabsan bogga lambarka bulshada ee www.ssa.gov. *(ingiriisi kaliya)*

Dakhligaagu waa khasab inuu ka yaraado SSI oo lagu daray deeqda aasaasiga ah ee Gargaarka Kaabida ee Minnesota (MSA). Tan kuma ay jirto wixii lacag ah ee la isku siiyo baahi gaar ah awgeed. Qofka kaligii ah, dakhliga ugu badani waa $1048 bishii. Si aad u dalbato, ka xareyso codsi xafiiska cayrta ee deegaankaaga. Qof shaqaale ah ayaa eegi dakhligaaga iyo hantidaadda si uu u eego inaad xaq u leedahay. Waxaad kaloo waxaad waydiisan kartaa inay boostadda kuu soo dhigaan codsi.

Ama ka codso khadka (online) adigoo galaya barta: https://mnbenefits.mn.gov. *(ingiriis kaliya)*

## Waa maxay xadka hantida ee u go'an MSA?

Hantida waxaa loola jeedaa lacag ama hanti ma guurto ah. Haddii lagu siiyo SSI heerka u degsan MSA waa mid la mid ah tan SSIda. Taasi waxa ay ka dhigan tahay hantida qof kali ah waa ilaa $2,000. Lamaaanaha waa ilaa $3,000. laakiin waxaa jira waxyaabo aan ala xisaabin:

- Guri

- Alaabada guriga kuu taal iyo alaabada shaqsiga ah

- 1 gaari, qiimaha gaariga lama eegayo, marba haddii adiga ama qof qoyska ka tirsan isticmaalayo.

- Hanti kasta ama qalabka shaqada oo dakhli kaa soo galo
- Ceymiska nolosha iyo ceymiska aaska oo gaaraya ilaa $1,500
- Dhulka qabri

Xadka u go’an hantida waa mid aad u sareeya ($10,000) dadka la siiyo Hawlgabka Lambarka Bulshada ama Macaashka Naafada laakiin aan aheyn SSI.




**Gargaarka Kabitaanka Minnesota ee Xaaladaha Degdegga ah (EMSA) ma jiroi Haddii ay jirto xaalad degdeg ah codso Gargaarka Guud ee Degdegga ah**. Akhri xogta urursan ee *Daryeelka Caafimaadka Degdegga ah.*

## Maxaan yeelayaa haddii la ii diido MSA?

Waxa aad xaq leedahay in aad racfaan ka qaadato. Waxaa jira oo aad racfaan u qaadan karto:

**Shabakadda internetka:**
Waxa aad ku buuxin kartaa oo soo gudbin kartaa codsigaaga barta internetka. Soo booqo: https://mn.gov/dhs.



→ Guji “How do I” (Sidee ayaan) ee dhinaca sare ee bogga
→ Oo hoos timaada “Find” guji “edocs and forms” (qoraalada iyo foomamka).
→ Guji luqada aad doneyso.
→ Ku qor 0033 halka baaritaanka

Waxaa kale oo aad heli kartaa tilmaamaha sida foomka loo buuxiyo haddii aad dooneyso in aad akhriso. Si taxadar leh u akhri, buuxi foomka oo dhan oo gurji “Submit (dir)” ee dhinaca hoose ee bogga. Waa fikrad wanaagsan in aad nuqul ka daabacato. Waa inaad heshaa shaashadda xaqiijinta ah ee muujinaysa in racfaankaagii la xareeyey.

**Boosta soo dhig ama faakis ku soo dir:**
Waxa aad ku qori kartaa waraaq oo aad boostada ama faakis ku soo diri kartaa. U sheeg in aad racfaan ka qaadaneyso go'aanada MSA oo la gaaray iyo sababta. Ha hilmaan in aad ku qorto warqadda lambarka dacwadda iyo taariikhda. Nuqul ka sameyso. Warqadaha ay degmadu kuu soo dirtay waxaa ku yaala cinwaanka iyo faakis lambarka aad ku soo direyso.

Akhri xogta urursan oo aad ka heli karto, *Racfaan U Qaadashada DHS*.



Waxa aad heysataa muddo 30 maalmood ah in aad racfaan ku qaadato laga taariikhda ku qoran ogeysiiska laguugu diiday. Waxa aad racfaan ka qaadan kartaa 90 maalmood gudahood haddii ay jirto sabab macquul ah oo aad racfaanka u qaadan weysay 30 maalmood gudahood.

Waxaa dhageysanaya qaaliga adeegga dadweynaha, kaasoo go'aan qoraal ah ka soo saaraya racfaankaaga. Haddii ay jirto xaalad degded ah, weydiiso **dadajinta** racfaanka (dadajinta waxa ay ka dhigan degdeg loo qabto). Ka dib taariikhda dhageysiga degdeg ayaa loo qabanayaa.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**